



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDW 159/2020

TR. 19/04/2020

UJEEDDO: SUGITAAN DHAXALKOOB & WAKAALAD GAAR AH.

Maxkamadda Horteeda waxaa yimid Labada Markhaatiyaal ee kala ah:-

1. **C/raxmaan Barkhuda Siyaad.** Dhashay 1970 Hooyo: Isniino Canshuur Passport Lr. 95321387, Sweden

2. **Xuseen Cismaan Waasuge.** Dhashay 1965 Hooyo: Malayko Maxamed Passport Lr. 720100267, U,K

Waxay Maxkamadda Horteeda ka marag fureen in ay geeriyootay Marxuumad la oran jirey: **DAHABO GUURE WAASUGE**, Kuna Geeriyootay Magaalada Marka ee Gobolka Sh/hoose Sanadkii 2016 labadeedii waalid iyo Saygeediina wey ka geeri horeeyeen, hadda la joogana Waxay Ifka uga tagtay oo dhaxlaya 1 Wiil, iyo 2, gabdhood Waxayna kala yihiin:-

DADKA

- | | | | | | |
|-------------|----------|----------|------------------------|---------------|---------------|
| 1. Maxamuud | C/Ilaahi | Xaashi. | Ku Geeriyooday Denmark | 2020 | (Wiilkeedii) |
| 2. Sahro | Axmed | Kulmiye. | Degan B/wayne | Dhalatay 1964 | (Gabadheedii) |
| 3. Ubax | Xasan | Cali. | Degan Muqdisho | Dhalatay 1970 | (Gabadheedii) |

Waxayna Markhaatiyaashu Cadeeyeen In Aysan Jirin Cid Kale Oo Dhaxleysa Marxuumada Hadey Noqon Laheyd Asal Ama Farac.

Intaas Kadib Waxaa Geeriyooday **Marxuum Maxamuud C/Ilaahi Xaashi**, Kuna Geeriyooday Denmark Bisha March ee Sanadka 2020, Labadiisii Waalidna Way Ka Geeri Horeeyeen Wuxuuna Ifka uga Tagay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban 1- Xaas, 3-Wiil, Iyo 1-Gabar, Waxayna Kala Yihiin :-

- | | | | | | |
|------------|----------|----------|---------------|---------------|---------------|
| 1-)Sahro | Axmed | Guure | Degan Denmark | Dhalatay 1965 | (Xaaskiisii) |
| 2-)Maxamed | Maxamuud | C/Ilaahi | Degan Denmark | Dhashay 1988 | (Wiilkiisii) |
| 3-)Farxiyo | Maxamuud | C/Ilaahi | Degan Denmark | Dhalatay 1989 | (Gabadhiisii) |
| 4-)Xasan | Maxamuud | C/Ilaahi | Degan Denmark | Dhashay 1995 | (Wiilkiisii) |
| 5-)Xuseen | Maxamuud | C/Ilaahi | Degan Denmark | Dhashay 1999 | (Wiilkiisii) |

Waxay Kaloo Markhaatiyaashu Maxkamadda ka hor Cadeeyeen in dhaxlayaashu yihiin intan oo kaliya oo qofna laga tagin qofna lagu darin isla markaasna ay masuul buuxa ka yihiin wixii ceebaal ama burin sharci ah ee ka yimaada dhaxalkan.

TARIKADA LAGA DHAXLAYO MARXUUMADA.

Waxay Kaloo Markhaatiyaashu Cadeeyeen in Marxuumad Dahabo Guure Waasuge ay Ifka Uga Tagtay Guri Dhisan Oo Ku Yaal Xamar Degmada (**Wadajir**) Lehna W.M.L.96/76, Tr,13/01/1976, Kana Soo Baxday Maxkamadda Dagmadda Xamar Qaybta Macaamiilaadka ayna Wada Saxiixayn Kaaliye C/Ilaahi Sh.Cumar iyo Garsoore C/raxmaan Sh.Maxamed, Cabirkiisuna dhan yahay (**20X20-M**), Lotto Lr. (**1088-Biis**) Soodintiisuna Waa Galbeed Waxaa Ka Mara Jid, Bari Waxaa Ka mara Jid Inta Kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad, Waxaana Guriga Ka Dhisan 4,qol oo Bulukeyti ah, iyo 1, Musqul

EEG BOGGA LABAAD



**WAKAALADAHA.**

- Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Maqan ee kala ah, **1-Sahro Axmed Kulmiye, 2-Sahro Axmed Guure, 3-Maxamed Maxamuud C/llaahi, 4-Farxiyo Maxamuud C/llaahi, 5-Xasan Maxamuud C/llaahi, 6-Xuseen Maxamuud C/llaahi**, ay Soo Wakiisheen **Ubox Xasan Cali**, Sida Ku Cad Wakaaladaha Gaarka ah ee kala ah, **A-Wakaalad Gaar ah Ref No.XNL/5089/2020 Tr.18/04/2020 Kana Soo Baxday Nootaayo Liibaan b/wayne uuna Saxiixay Dr, Liibaan C/llaahi Muumin, B-)Wakaalad Gaar ah Ref NO.SOMEMB/FR/WAK/71/2020 Tr.08/04/2020 Kana Soo Baxday Safaarada Jamhuuriyadda Fedaralka Somaliya ay Ku leedahay France uuna Saxiixay Qunsulka Safaarada Axmed M.Xaaji Cali "Axmed Shire" Waxaana Wakaaladaan Wada Xaqiijiyey Wasaarada Arimaha Dibadda ee D.F.Soomaaliya iyo Maxkamada Racfaanka Gobolka Banaadir, Una Wakiisheen In ay Gadi Karto, Dhisi Karto, Kireyn Karto, U Dacwoon Karto, Qareen U Qaban Karto, U Matali Karto, Qof Waliba Qeybta Ay Ku Leedahay Guriga Dhisan Oo Ay Ka Dhaxleen **Marxuumad :- Dahabo Guure Waasuge****

DAMIINU MAAL

- Maxkamadda Horteeda Waxaa Yimid **Axmed Bootaan Cabdi** Dhashay 1990 Hooyo: Saciido Cali Weheliye W.A.L. 000052499, Somalia, wuxuu Maxkamadda Ka Horcadeeyey in uu Damiinul Maal Buuxa ka yahay, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana uu Ka Yahay Wixii Ka Yimaada Wakaaladaha Sare Ku Xusan

= SAXIIXA MARKHAATIYAASHA =

1- C/raxmaan Barkhuda Siyaad


2-) Xuseen Cismaan Waasuge



= SAXIIXA WAK/DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA == SAXIIXA D.MAALKA =

Ubox Xasan Cali

Axmed Bootaan Cabdi



GO'AANKA MAXKAMADDA.

Markay Maxkamaddu dhagaysatey Marag furka Markhaatiyaasha, Markay Aragtey Codsiga Wakiilka dhaxaltooyada Kana Mid ah Dhaxaltooyada, Markey Aragtay Dukumintiga Guriga oo ay Marxuumada ku qoran tahay, Markey Aragtay Wakaaladaha Gaarka ah ee Soo Direen Dhaxaltooyada Maqan, Waxay Maxkamadda Degmad Wadajir ay sugaysaa Geerida Marxuumiinta Kala ah :- **Marxuum Dahabo Guure Waasuge & Marxuum Maxamuud C/llaahi Xaashi** oo ah Labo Marxuum oo Kala geeri Horeeyey oo is Dhaxlaha Oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare lagu soo xusey oo kaliya, Waana sugid Dhaxalkoob, Cadeyn Tariko iyo Wakaalado Gaar ah oo Ansax ah waafaqsana sharecadda Islaamka iyo qaanuunka Dalka, Maxkamadduna waa ka saxiixdey dhinacyada uu khuseeyey, waxaana lagu qorey Diiwaanka Maxkamadda.

Kaalayaha Maxkamadda
C/risaaq Cali Cabdi (Caabi)

Garsooraha Maxkamadda
Dr. Maxamud Xasan Hilowle



